

Tix: MDM/XM/252/08/2026

Tr: 05/09/2026

WAREEGTO

Nidaaminta Gaadiidka Xamuulka ee Dekedda Muqdisho

Ku: Daladda Gaadiidka Xamuulka Soomaaliyada
Ku: Taliyaha Saldhiga Booliiska Dekedda
Ku: Shirkadda Mogadishu Alport
Og: Wasaaradda Dekedaha & Gaadiidka Badda
Og: Wasaaradda Gaadiidka & Duulista Hawada

Muqdisho
Muqdisho
Muqdisho
Muqdisho
Muqdisho

Maareeyaha Dekedda Muqdisho:

Markuu arkay: Warbixinta laga sameeyay badqabka & Nadaafadda gudaha xeyndaabka Dekedda.

Markuu arkay: Xeerka Wakaaladda Dekedaha Soomaaliyeed ee soo baxay 15 April 1978, qodobkiisa 73aad. & Xeerka Taraafikada Soomaaliyeed ee soo baxay 16 December 1962, qodobkiisa 75aad.

Markuu arkay: Shilalka ay sababaan gaadiidka Xamuulka ee ka shaqeeya gudaha Dekedda.

Markuu tixgeliyay: Ahmiyada ay leedahay in la nidaamiyo Gaadiidka Xamuulka ee ka howlgala Dekedda Muqdisho, maadaama ay qeyb ka yihiin howl maalmeed Saarista/ Dejinta iyo habsami usocodka howlaha Dekedda.

Markuu garawsaday: Xilka ka saaran ilaalinta, Hubinta badqabka Hantida, dadka Dekedda ka howl gala iyo nadaafada guud ee Dekedda.

Markuu la tashaday: Shirkaddaha maamula gaadiidka xamuulka ee ka howlgala dekedda Muqdisho. Wuxuu soo saaray wareegtadan lagu nidaaminayo Gaadiidka Xamuulka ee ka howlgala Dekedda:

- 01 Waxaa la mamnuucay in gaadiidka lagu kaxeeyo gudaha dekedda xawaare ka badan 10-20 km/h.
- 02 Waxaa la mamnuucay in gaadiidka la dhigo meel aan baabuurta loogu tala galin ama ay xiraan wadooyinka gudaha dekedda.
- 03 Darawalku waa in uu la joogaa gaarigiisa inta uu gudaha dekedda ku jiro.
- 04 Darawalku waa in uu si joogto ah uga taxadaro dadka iyo gaadiidka kale.
- 05 Waxaa mamnuuc ah in uu wado gaadiidka qof aan haysan rukhsadda wadidda (Driving license).

- 06 Dadka gaadiidka la socda waa in ay ilaaliyaan nadaafadda dekedda, lagumana shubi karo barxadaha iyo badda waxyaabaha, sida saliidaha iyo haraadiga gaadiidka.
- 07 Waxaa mamnuuc ah in qof uu hoos seexo baabuurta ku sugan gudaha dekedda.
- 08 Darawalada waxaa la farayaa in ay hagaajiyaan xaaladda farsamo ee gaadiidkooda (roadworthiness), sida; bareega, layrarka iyo IWM.
- 09 Waxaa mamnuuc ah isticmaalka codadka aan loo baahnayn ee sare, sida hoonka iyo sheelaraynta aan daruuriga ahayn.
- 10 Gaadiidka siday badeecooyinka khatarta ah (dangerous goods) waa in si taxaddar leh loo raro loona dejiyo.
- 11 Baabuur kasta waa inuu wataa dukumiintiyada lagama maarmaanka u ah ee u ogolaanaya in uu ka shaqeeyo Dekedda.
- 12 Baabuurta aan lahayn shirka hore, kabiinka iyo muraayadaha waa in ay soo dhammaystiraan mudo shan (5) bilood ah, kana bilaabanaysa marka wareegtadaan la soo saaro.
- 13 Waxaa mamnuuc ah in laba baabuur isku baasaan gudaha dekedda.
- 14 Darawal kasta wuxuu masuul ka yahay caawiyaha(kirishbooy) iyo alaabta uu wado.
- 15 Darawalada waa in ay u hoggaansamaan awaamiirta shaqaalaha dekedda iyo hay'adaha amniga.
- 16 Sigaarka laguma cabi karo marsooyika, bakhaarada, meelaha ka ag dhow badeecadaha khatarta ah (dangerous goods) iyo meelaha dadku isugu yimaadiin.

Fiiro Gaar ah: Cidii aan u hogaansamin awaamiirta ku xusan wareegtadaan, waxaa laga qaadayaa talaabo sharci ah.

Fulin Wacan.

Mohamed Ali Nur

**Amb. Mohamed Ali Nur
Maareeyaha Guud**

